



# Warar & Qoraalo: Roosevelt oo qabatay Bandhiga Midnimada ee 2<sup>-aad</sup>; ardayda Dhaladka Maraykanka oo la aqoonsaday; dhagax jebin lagu sameeyay Dugsiga Sare ee Madison

Dugsiga Sare ee Roosevelt wuxuu leeyahay mid ka mid ah ardayda ugu badan ee kala duwan marka la eego Oregon, isaga oo dugsigu Jimcihi sanadkii labaad u dabaaldegay Bandhiga Midnimada ‘Unity Fest’. Dhacdada oo ay soo qorsheeyeen isla markaana ay soo abaabuleen arday ka kala socotay lix fasal oo lagu Darso Qowmiyadda oo dugsigu leeyahay, aya soo jiidatay boqolaal arday ah iyo xubnaha bulshada ka tirsan oo yimiday dhismaha North Portland.

Dhacdada aya lagu soo bandhigay bandhigyo badan oo kale duwan, oo ay ku jiraan qoob ka ciyaarayaasha dadka dhulka loogu yimid, gabay ereyga lagu hadlo, muusik dhaqameed, qoob ka ciyaarka dagaalada ee Jasiiraddaha Baasifiga iyo kuwo kale oo badan. Cuntada waxaa sameeyay ardayda Daraasaadka Qowmiyadda iyo qoysaskooda, ardayda fasalka Senior Inquiry iyo macallimiinta.

## [Fiiri sawirro buuxa oo ka socda dhacdada](#)

**Ardayda Dhaladka Maraykanka oo la aqoonsaday:** Arday ka kala socota 11 dugsiyada sare ee PPS aya loo aqoonsaday munaasabadda sanadlaha ah ee Maalinta Sharafta, oo toddobaadkii la soo dhaafay ka dhacday Jaamacadda Gobolka Portland Qaybteeda Hindida Dhaladka Maraykanka ah iyo Xarunta Bulshada Ardayda. Marka la isku daro, 21 arday oo ka kala socda dugsiga PPS, oo ay weheliyaan laba arday oo ka socota dugsiyada kale, oo dhawaan qalin jabinaysa ee qaata barnaamijka Waxbarashada Hindida Dhaladka ah ee PPS aya la aqoonsaday.

Ardaydu waxay ka tirsan yihii qabiilo kala duwan oo degan Oregon iyo meelo kale. Dhacdada waxaa la qaybtay iyada oo lagu xusuusanayo of Corbin Lunceford, oo ahaa arday Waxbarashada Hindida Dhaladka ah ka tirsanaa oo dhiganayay Grant oo geeriyooday sanadkii la soo dhaafay.

## [Fiiri liiska buuxa ee ardayda la sharfay](#)

## [Fiiri sawirro buuxa oo ka socda dhacdada](#)

**Dhagax jebin laga sameeyay Dugsiga Sare ee Madison:** Badeelada/majarafadaha xafladda loogu talagalay waxay yimaadeen iyaga oo leh cabirro loogu talagalay dadka waaweyn iyo carrruurga iyada oo dhagaxa/dhulka la jebiyay taasi oo ku saabsan mashruuca dhismaha labada sano socon doona ee lagu casriyeyn doono Dugsiga Sare ee Madison. Munaasabadda, oo la qabtay Sabtidii, waxaa horseed ka ahaa Maamulaha Petra Callin waxaana lagu soo bandhigay hadalo ay jeediyeen U.S. Rep. Earl Blumenauer, Kormeeraha Guud Guadalupe Guerrero iyo ardayga Madison ka qalin jabiay 1986 ee Kent Bottenfield, oo kubadda u soo tuuray ‘pitched’ sideed kooxood oo kala duwan oo ah Horyaalka Weyn ee Baseball-ka.

Ka dib marka uu sanad dugsiyeedka 2018-19 ka soo gebagaboobo Madison, shaqada ayaa bilaabmi doonta taasi oo ku saabsan mashruuca casriyeynta oo ay ku jiri doonaan in ka badan 170,000 square feet oo ah dhismo cusub. Ardayda Madison waxay guuri doonaan dhismaha Dugsiga Sare ee Marshall muddo laba sano ah ka hor inta aanay dhisme si buuxda loo casriyeeyay dib ugu soo guurin 2021.

[Fiiri sawirro buuxa oo ka socda munaasabadda](#)

[Ogow waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan mashruuca casriyeynta Madison](#)